

September 2022



Gabar toban jir ah oo waxbarasho aada hooyadeedna ka caawisa shaqada guriga Deegaanka Canfarta, Ethiopia
© Nathalie Bertrams/GAGE 2022



Dedejinta geedisocodka cidhibtirka guurka carruurta iyo Gudniinka gabdhaha ee xoolo-dhaqatada Itoobiya: mudnaanta siyaasadda iyo barnaamij-dejinta

Qoraayada: Kefyalew Endale, Nicola Jones, Elizabeth Presler-Marshall, Tassew Woldehanna, Workneh Yadete¹, Abdilahi Abdisalam, Abreham Alemu, Yitagesu Gebeyehu, Kiya Gezahegne, Robha Murha, Abel Tesfaye, Kassahun Tilahun and Fitsum Workneh²

Guudmar

Guurka carruurta iyo gudniinka gabdhahaba waxa ka dhasha cawaaqib-xumo ballaadhan oo saameeya qofka noloshiisa inta ka dhiman iyo dhammaan jilasha mustqbalka. Sidaas darteed, wax ka qabashada caadooyinkan xun-xun ayaa yeelatay mudnaanta koowaad ee horumarineed. Labo kamida tilmaamayaasha yoolasha horumarka waara 5 (sinnaanta jinsiga) ayaa si toos ah ula xidhiidha caadooyinkan- 5.3.1 (cidhibtirka guurka carruurta) iyo 5.3.2 (cidhibtirka gudniinka haweenka). Itoobiya waxay 20 kii sannie lasoo dhaafay horumar xawli ah ka gaadhay xakamaynta guurka carruurta iyo gudniinka haweenka. In kastooy sidaa tahay, haddana waxay kamid tahay 5ta waddan ee gabdhaha ugu tirada badan

¹ Shanta qoraa ee ugu horreeya magacyadoodu sida alifbeetaday ukala horreeyaan maadaama ay dhammaantood ay si weyn uga qayb qaateen falanqaynta aasaaska u ahayd qoraalkan kooban

² Kooxda labaad ee qoraayaasha ahna sidoo kale alifbeetadaa loo kala horreysiiyey waxayna ku lug lahaayeen xog ururinta iyo falanqaynta xogta hordhaca ah labadaba. Liis buuxa oo mahadnaq ah ayaa lagu daray warbixinta dheer ee qoraalkan koobani ku salaysan yahay.

lagu guursaday carruurnimadooda guud ahaan caalamka. In kastooy sidaa tahay, haddana waxay kamid tahay 5ta waddan ee gabdhaha ugu tirada badan lagu guursaday carruurnimadooda guud ahaan caalamka.

Ka waddan ahaan heerka gudniinka haweenka iyo guurka carruurtuba si weyn bey u kala duwan yihiin iyadoo deegaanada qaar hoos udhac aad uweyn laga arkayo, halka kuwo kalena aysan wax horumara ka sameyn arrintan. Canfarta iyo soomaalidu waa deegaanada ugu heerka sarreeya gudniinka haweenka guud ahaan Itoobiya (91% iyo 99% haweenka da'doodu tahay 15-49 siday u kala horreeyaan); da'da dhexdhexaadka (median) waqtiga guurka u horreeya ee Canfartu wuu ka hooseeyaa celceliska waddanka (16.4 sanno barbardhig 17.5 sanno). Si waafaqsan khariirada qaran ee cidhibtirka guurka carruurta iyo gudniinka gabdhaha ee Itoobiya (2020-2024), iyo sidoo kale ka go'naanshaha waddanka ee xaqiijinta Yoolasha horumarka waara, waxaa mashruuc cusub oo cilmi-baariseed billowday dawladda Ireland. Mashruuca waxa loogu talo-galay in uu soo saaro caddeymo tilmaamaya heerka ay waqtigan maraayaan gudniinka haweenka iyo guurka carruurnimaduba ee bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah iyo waxyaabaha ayidaya sidoo kalena in muddo kadib loo isticmaalo qiimeeynta barnaamij wajiyo-badan oo ay fulinayso hay'adda badbaadada carruurta kaas oo loogu talo-galay cidhibtirka gudniinka haweenka iyo guurka carruurta (eeg sanduuqa 1).

Qormo siyaasadeedkani waxay soo koobaysaa natiijooyin kasoo baxay cilmi-baaris la sameeyay billowgii 2022 (fiiri Endale et al., 2022). Waxaa kale oo ay qeexaysaa tilmaamaha natiijooyinkani u leeyihiin

siyaasad-dejinta iyo barnaamij-dajintaba, marka lagu daro hirgelinta qorshaha qaranka. Waxaa mudan in la xusuusnaado in aan talooyinkan laga soo minguurin gorfayn ay samaysay hay'adda badbaadada Carruurta maadaama cilmi-baaristan loogu talo-galay in loo isticmaalo gundhig ahaan. Taa bedelkeed, Talo-bixinnahani waxay salka ku hayyaan natiijooyinkii ballaadhnaa ee kasoo baxay darsiddii dhaqamada iyo caadooyinka la xidhiidha gudniinka haweenka iyo guurka carruurta.

Gogoldhigga xaalada

Guurka carruurta iyo Gudniinka gabdhuhuba waxay Itoobiya ka ahaayeen sharci-darro laga soo bilaabo 2000 iyo 2005tii siday ukala horreeyaan. Dadaalada dawladeed ee lagu cidhibtirayey caadooyinka waxyeellada leh waxaa laga dheehan karaa siyaadaha qaran ee tobankii sannee lasoo dhaafay. Sannadkii 2013, waxay wasaarada haweenka, carruurta iyo dhallintu billowday istraatejiyad qaran oo wax lagaga qabanayo caadooyinka waxyeellada leh ee ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha, iyadoo taa ku xigsiisay in sannadkii 2019 la dejiyo qorshaha qaran ee lagu joojinayo guurka carruurta iyo gudniinka gabdhaha sannadka 2025.

Iyadoo cuskanaysa haykallada sharci iyo siyaasadeed ayey Itoobiya ku tallaabsatay guulo heer qaran ah oo kadhac ah cidhibtirka guurka carruurta iyo gudniinka gabdhaha. Sida laga dheegtay sahanka dadka iyo caafimaadka Itoobiya (EDHS), sannadkii 2000, 14% dhoolood ayaa la guursaday iyagoon 15 jirsan, 49% kamid ah gabdhaha yaryar ayaa sidoo kale lagu guursaday iyagoon gaadhin 18jir (CSA and ORC Macro, 2001). 2016 kii, waxay tirooyinkaasi

Sanduuqa 1: Awoodsiinta dumarka iyo gabdhaha si loo yareeyo guurka carruurnimada iyo gudniinka gabdhaha deegaanada Canfarta iyo Soomaalida: hindise barnaamij-dejineed oo cusub

Dawladda Ireland, oo kaashanaysa Hay'adda badbaadada carruurta, waxay taageero siisaa barnaamij 5 sanno soconayo oo ku kacaya lacag dhan €7.8 milyan kaas oo loo yaqaan 'Taageerida haweenka iyo gabdhaha kunool dhulalka joogoodu hooseeyo ee Itoobiya si ay u xaqiijiyaan xuquuqahooda, uguna noolaadaan nolol caafimaad iyo waxtar leh oo ka madhan xad-gudub iyo tacadi'. Waxa ujeedkeedu yahay inay awoodsiiso hablaha iyo dumarka da'da yar dhaqaale ahaan iyo bulsho ahaanba, ayna dhimaan saamaynta taban ee caadooyinka iyo dhaqamada jinsi ee waxyeellooyinka leh- gaar ahaan gudniinka iyo guurka carruurnimadu ay ku leeyihiin noloshooda.

Barnaamijkan waxa laga hirgelinayaa saddex degmo oo laba gobol oo degaanka Canfarta (degmada Aysaita ee gobolka 1 iyo Semurobi iyo Hadelella ee gobolka 5) iyo saddex degmo laba gobol oo deegaanka somalida ka tirsan (degmada Daroor ee gobolka Jarar iyo degmooyinka Xarshin iyo Goljano ee gobolka Faafan). Lixda waaxood ee barnaamijkan wuxuu diirada saarayaa keliya maaha gabdhaha iyo haweenka da'da yar balse sidoo kale adeeg bixiyayaasha maxalliga ah, wiilasha iyo ragga waaweyn, iyo bulshooyinkaba. Lixda waaxood waxay kala yihiin: (1) Awoodsiin dhaqaale, oo ay ku jiraan hanti iyo lacag caddaan ah in la siiyo, inay fursad u helaan adeeg wax-keydsi iyo amaah, iyo taageero iskaa-ushaqaysi; (2) Taageero agab, si looga caawiyo gabdhaha aan dugsiyada dhigan inay is diwaangeliyaan, iyo taageero naqtiin-wax barasho, si kor loogu qaado guusho waxbarasho ee hablaha; (3) ka qayb-gelinta hablaha iyo dumarka, sida tababarada hogaamineed iyo naadiga gabdhaha, si haweenka iyo gabdhuhuba ay awood ugu yeeshaan inay si adag ugu doodaan xuquuqahooda; (4) ka ilaalinta tacadiga ka dhanka ah jinsiga, iyo taageerida kuwii la kulmayba inay helaan ilaalo iyo adeegyada Caafimaad ee taranka iyo galmada; (5) kaqeybgelin bulsheed, sida inay ka shaqeeyaan goobaha ragga waaweyn iyo wiilasha keliya loogu gaar yeelay ee ay raggu hogaamiyaan, sidoo kale in wada hadal nidaamsan lala yeesho kaas oo ay hormuud ka yihiin hogaaminta dhaqanka iyo diintuba; iyo (6) dhisida cududda iyo xidhiidhinta, sida tababarka hoggaaminta maxalliga iyo adeeg bixiyayaasha.

hoos ugu dhaceen 6% iyo 40% sida ay u kala horreeyaan (CSA and ICF, 2017). Xog-ururintii sannadka 2000 waxay sheegtay in 71% gabdhaha jira da'da u dhaxaysa 15-19 lagu sammeeay gudniin (CSA and ORC Macro, 2001). Sannadkii 2016 waxay tiradaasi hoos ugu dhacday 47% (CSA and ICF, 2017). Si kastaba ha ahaatee, sidaan horay usoo sheegnay, horumarkaa lagu tillaabsaday ma ahayn mid si siman ay u gaadheen deegaanadu. heerarka gudniinka gabdhaha ee deegaanada "soo koraya" ee Itoobiya- oo ay ku jiraan xoolo-dhaqatada Canfarta iyo Soomaalidu- waa kuwo meeshoodi taagan, halka heerarka guurka carruurnimadu ay umuuqdaan kuwo kordhaya (CSA and ORC Macro, 2001; CSA and ICF, 2017; Elezaj et al., 2019). Labada deegaanna weli maysan qallinka ku duugin sharciga qaran ee qoyska kaas oo mamnuucaya gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta. Waxaanse layaab noqon, iyadoo la arkayo xidhiidhka ka dhexeeya caadooyinka waxyeellada leh iyo dhaqamada jinsi ee bulsheed, inay deegaanadani yihiin meelaha fursadaha waxbarasho iyo shaqo ee hablaha iyo dumarkuba aadka u liitaan ama u xaddidan yihiin (Presler-Marshall et al., 2022). Iyadoo ay qaabeynayaan maan-kuhaynta yoolasha horumarka waara, kuwaasoo xooga saaraya kuwa khatarta ugu jira in 'gadaal u hadhaan', dawladda Itoobiya iyo bahwadaagteedu waxay kor uqaadeen dhawaan dadaalada loogu jiro cidhibtirka caadooyinka waxyeellada leh ee ka jira deegaanada soo koraya.

Habraacyada Cilmi-baarista

Qormo siyaasadeekani wuxuu ku salaysan yahay natiijooyinkii qiimayn-gundhigeed baaraysay qaababka iyo jiheeyayaasha guurka carruurta iyo gudniinka gabdhaha ee deegaanada Canfarta iyo soomaalida. Gundhigani waxa uu qayb ka yahay qiimayn cilmibaadhiseed mudo dheer taasoo ka kooban saddex wareeg oo xog uruurin tiro-raac iyo tiraab-raacba leh (quantitative and qualitative) oo la kala qabanaayo sannadada 2022, 2024 iyo 2026. Cilmi-baaristan waxaa majaraha u haya barnaamijka Gender and Adolescence: Global Evidence (GAGE) iyo ODI, iyagoo

Natiijooyinka doorkooda

- Kudhawaad saddex meeloodo meel ka mida sindheerta ka qayb-gashay daraasadan, dugsi lama diwaan gelin, halka kuwa la diwan-geliyayna ay ka weyn yihiin da'da fasaladooda.
- Helitaanka waxbarasho ee gabdhuhu wey ka liidataa wiilasha—gaar ahaan Soomaalida— taasoo ay keeneen caadooyin jinsi oo muxaafadnimo, agabka nadaafadda oo ku yar dugsiga iyo amni xumo ay dareemaan waqtiga ay dugsiga ku socdaan ama ka socdaan.

la kaashanaaya cilmi baarayaal ka socda jaamacada Addis Ababa iyo shirkadda Quest Consulting. Waxaa kaloo kooxdan qayb ka ah cilmi-baarayaal ka kala socda deegaanada Canfarta iyo Soomaalida.

Qaybta tiro-raacu waxay ka koobantahay 2,042 guri (2,042 carruur ah oo da' ahaan jira 10-19 iyo 2,042 waalid), taasoo si isleeg loogu qaybiyay labada deegaan. Tirada muunadaha (sample) waxaa loo qoondeeyay si ay u muujin karaan hoos udhaca ku yimaada tilmaamayaayasha gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta boqolkiiba 10 dhibcood, iyo awood dhan 95%. Tirada muunada waxaa lagu kordhiyay 15% si loogu talo-galo haddii goosti yimaad. Deegaan kaste, waxaan xog ka soo uruurinay 9 qabalee (bulsho) kuwaasoo barnaamijkan laga fulin doono iyoi 9 qabalee oo aan heli doonin barnaamijkan. Dhammaan qabaleeyeedu waxay ku yaalaan miyi, inkastoo qaar aad uga fog yihiin kuwa kale. Muunada daraasadayada tiraabraacu ku waxay ka koobnayd qayb kamida carruurtii (t=295) iyo waalidkood (t=166), kuwaasoo qayb ka ahaa waraysiyo shaqsi shaqsi iyo kuwo kooxeedba. Waxa kale oo ku jiray waraysi lala yeelanayo bulshada (qabalaha/tuulada), degmada iyo masuuliyiinta heer deegaan, hogaamiyayaasha beelaha iyo diinta, adeeg bixiyayaasha iyo shaqaalaha heer degmo iyo heer deegaanba ee hay'adda badbaadada carruurta (t=84).

Natiijooyinka doorka ah Waxbarashada

Ku dhowaad shan meelood laba (39%) kamid ah dadka da'da yar ee muunada daraasada Soomaalida, iyo rubuc (27%) muunada canfarta ayaa sheegay in aan weligood dugsi la diwaan gelin. Kuwaas waxaa ugu badnaa gabdhaha. Deegaanka Soomaalida, 43% oo kamida gabdhaha ayaan weligood la diwaan gelin marka la barbar dhigo 27% wiilasha. Canfarta, farqiga jinsi wuu yaraa, laakiin wiilashu waxay boqolkiiba 5 dhibcood uga dhow yihiin in la diwaangeliyo gabdhaha (27% vs. 32%). Waxay u badan tahay gabdhuhu inay ka hadhaan dugsiga marka la barbar dhigo wiilasha. Dhallintii da'da yareyd ee diwaan gashanaa waqtigii xog-ururintayada, ku dhawaad dhammaantood wey ka weynaayeen da' ahaan fasalka ay dhiganayeen.

Daraasadayadii tiraab-raacu waxay aqoonsatay caqabado farabadan oo is-gudbaya oo ku gudban helitaanka waxbarasho, kuwaas oo ay aad isaga mid ahaayeen deegaanadu. Gabdhaha iyo wiilashuba si isku mid ah ayey caqabadahan ula kulmeen, waxaana ka mid ah: dugsi masaafu dheer loo soconayo (gaar ahaan dugsiyada heerarka dhexe iyo sare); dugsiyo bilaa biyo la cabi karo ah (gaar ahaan marka la eego masaafada dheer ee la dhex soconayo saxaraha); Macalimiin inta badan habsan ah, iyo aqoon tayodeedu hooseyso. Gabdhuhu waxay lakulmaan

caqabado farabadan. Waxaa kamid ah, masuuliyada shaqada guriga oo ah mid aad u adag taasoo keeni karta in ay gabdhuhu ka daahaan isdiwaangelinta, inay si jooqta ah dugsiga uga habsaamaan, inay horey uga baxaan, helitaan xaddiidan oo agabka nadaafada dhiiga caadada ah iyo suuli/meel lagu maydho oo iyaga gaar u ah, iyo la'aanta

Natijoyinka doorkooda

- Haweenku si ka yar sida ragga ayey isugu arkaan 'xoogsadayaal'—waxaanay leeyihiin hanti yar oo wax soosaar leh.
- Haweenka soomaalida ayaa ka hab-nololeedyo badan kuwa Canfarta.
- Haweenku ragga waa ka go'aan-ku-yeelasho yar yihiin arrimaha dhaqaalaha, gaar ahaan marka dhinaca ragga laga eego weliba deegaanka Canfarta.
- Haweenka soomaalidu waxay sheegeen in ay gaadhaan go'aanno dhaqaale oo madaxbannaan in ka badan inta haweenka Canfarta.

gaadiid amni ah oo geeya dugsiyada. Guurka carruurta ayaa isna ah shay muhiim ah oo qayb ka ah dugsi-kabixitaanka gabdhaha, gaar ahaan waxbarashada fasallada saree dugsiga hoose iyo dugsiga sareba. Jawaab-bixiyayaasha deegaanka soomaalidu waxay sheegeen in quudinta dugsi ay berigii hore dhiirigelin jirtay isdiwaangelinta oo markii

la joojiyay is-diwaangelintu hoos u dhacday. Waxaa kaloo ay ku dareen in daryeel-bixiyayaashu ay diidaan inay dugsiyada u oggolaadaan gabdhahooda iyagoo ka cabsi qaba in ay gabdhuhu xidhiidh galmo la yeeshaan wiilasha.

Awoodsiinta dhaqaale

Waxaan layaab ahayn, maadaama haween aad u tiro yar oo Canfarta (44%) iyo Soomaalidu (31%) ay isu arkaan gurijoog, in raggu in kabadan dumarka – Canfarta (72% vs. 49%) iyo Soomaalida (72% vs. 40%) – ay sheegaan in beera-falashadu (xoolodhaqasho iyo dalag) ay tahay shaqadooda koowaad. Kala duwanaanshaha shaqooyinka ugu muhiimsan ee ragga iyo dumarku waxay saameyn ku leedahay hab-nololeedka qoyska. Deegaanka Canfarta, qoysaska haweenku madaxda ka yihiin ayaa in aad uga badan kuwa ragga madaxda ka yihiin ku tiirsan Xoolaha (77% vs. 69%) iyo ganacsiyada yaryar (6% vs. 1%). Waxaysan aad ugu tiirsanayn dalag beerashada (12% vs. 22%). Soomaalida, waa kala duwan yihiin qaababku. Marka la barbar dhigo qoysaska raggu madaxda ka yihiin, kuwa haweenku ka madax yihiini waxay aad ugu tiirsan yihiin ganacsiyada yaryar (23% vs. 14%), laakiin si isku mida ayey ugu tiirsan yihiin dalag beerashada (22% vs. 19%), iyo xoolodhaqashada (38% vs. 43%). Deegaanada dhammantood, qoysaska haweenku umadaxda yihiini waxay leeyihiin kala badh dhulka kuwa raggu u taliyaan leeyihiin. Waana ka xoolo yar yihiin.



Waxay ku hammiyaysaa inay bulshadeeda caawiso iyadoo ah xirfadle caafimaad, gabadh da' yar oo kasoo jeeda Deegaanka Soomaalida, Ethiopia © UNICEF Ethiopia/2015/Bindra

Natijoooyinka doorka leh

- Canfarta, gabdhaha waxa la gudaada sebinimada. Soomaalida, waxa la gudaada markay 'foodlay' noqdaan, mararka qaarna gabdhaha ayaaba sheegta inay waqtigii la gudi lahaa gaadheen.
- Hooyoooyinka ayaa leh go'aanka haddii iyo markii gabdhaha la gudayo.
- Tiro badan oo gabdhaha kamid ah waxa guda haween dhaqameed – laakiin deegaanka soomaalida gaar ahaan waxa jira caddeymo kordhaya oo tilmaamaya in gudniinka la dhakhtaraynayo.
- Labada deegaanba, ka qayb-galayaasha daraasada waxay sheegeen in dhaqanku yahay shayga ugu muhiimsan ee ku riixa gudniinka.
- Ka qayb-galayaasha daraasada ee deegaanka soomaalida ayay u badan tahay in ay sheegaan in gudniinku yahay waajib diini ah marka la barbardhigo qayrkooda Canfarta.
- Ka qayb-galayaasha daraasada ayay u badan tahay inay sheegaan in gudniinka gabdhuhu leeyahay faa'iidooyin – ta koowaadi tahay in la xakameeyo qooqooda iyo in la xaqiijiyi in ay guur heli karto – ka badan khatarahiisa.
- Gudniinku ma aha dhacdo 'hal mar ah'—waxay sababtaa xanuun iyo dhaawac qofka noloshiisa oo dhan.
- Aqoonta laga qabo sharciga dambiga ka dhigaya gudniinku wuu hooseeyaa gebi ahaan, waalidiinta soomaalidu aqoon aan sax ahayn bay u leeyihiin marka la barbar dhigo dhigooda canfarta. Soomaalida, in kor loo qaado wacyiga sharciiyee ayaa dhimi karta taageerada.
- Taageeridda gudniinku waxay ku xidhan tahay wacyiga laga qabo khataraha, iyo waxa laga aaminsanyahay faa'iidooyinkiisa iyo waajibnimadiisa diiniga ah.
- Canfarta, marka laga reebo soomaalida, in gabdhaha wax la baro ayaa noqon karta istaraatajiiyad lagu dhimi karo taageerada gudniinka gabdhaha - laakiin in dhaqaale ahaan la awoodsiyo waxay kordhin kartaa taageerada caadadan.

Go'aan qaadashada arrimaha maaliyadeed ee haweenka wey ku kala duwan yihiin deegaanadu, laakiin way ka hooseeyaan kuwa ragga. Canfarta, kudhawaad afartii meeloodba saddex haweenku waxay sheegeen inay go'aanka la wadaagaan raggooda. Soomaalidase, dhinaca kale,shan meeloodoo afar baa sheegay inay iyagu go'aanada maaliyadeed qaataan(iyagoon la tashan raggooda). Labada deegaanbase, xog-ururintayadu

waxay heshay in raggu sheegeen in haweenku gashi yar ku leeyihiin go'aanada maaliyadeed; in kayar inta haweenku umalaynayaan inay leeyihiin.

Natijoooyinka daraasadaya tiraab-raacu waxay faahfaahinayaan natijoooyinkii xog-ururintii hore. Canfarta, waxay sheegeen jawaab-bixiyayaashu in xaga raggu ay masuul ka yihiin iibinta meesiyada xoolaha waaweyn (lo'da, dibida, iyo geella), in haweenku xaq uleeyihiin inay iibiyaan xoolaha yaryar ayna kaantarooli karaan faa'iidada laga helo iibkaas. Dumarku waxay sidoo kale ku tasarufi karaan iibka dhuxusha iyo dhuxusha waxaanay lacagtaa u isticmaali karaan inay reerka kharashaadkiisa ku dabaraan. Meelaha qaar sida degmada Aysaita, xagaasoo dhaqanka wax-amaahashada iyo wax-kaydsigu ku xoogan yihiin, dumarka ayaa ah dadka ugu badan ee isticmaala kaysi-bulsheedka iyo adeegyada amaahaha.

Soomaalida, haweenku keliya ma go'aamiyaan in iyo goorta la gadayo xoolaha yaryar ee laga helo kharashka reerku biishado, balse loogama baahna in ay raggooda wax ka siiyaan kharashkaa. Waxaase xiiso leh, ragga waxaa laga rabaa in ay dakhligooda la wadaagaan xaasaskooda. In haweenku xakameeyaan hantida maaliyadeed waxay saamayn xooggan ku leedahay gudniinka gabdhaha, maadaama ay taasi ka dhigan tahay in ay haweenaydii awood uleedahay kharashka ay gabadheeda ku gudi lahayd.. waxaa kale oo ay ragga udiidaan ama waddo ka marisaa in inay diidi karaan in gabdhahooda la gudo/jaro.

Qaababka iyo dhiirigeliyayaasha gudniinka gabdhaha

Natijoooyinkanagu waxay tilmaamayaan in deegaanada dhamaan, gabdhaha 10-19 jira badankood la guday. Si kastaba ha ahaatee, caadooyinku aad ayey ukala duwan yihiin, waxayna ubaahan yihiin in si taxadar leh loogu diyaariyo xal.

Canfarta, 96% gabdhaha maqlay gudniinka, 97% ka mid ah hora loo guday, badan koodu iyaga oon gaadhin hal sanno jir. Markaad eegto qaabka gudida, 83% gabdhahan kamid ihi waxay sheegeen in loo guday qaabka fircooniga iyagoo leh boog. Inta hadhay waxay sheegeen in loo guday qaabka 2aad (14%) ama qaabka 1aad (3%).³ Iyadoo la ogyahay in ay adag tahay kala soocidda diinta iyo dhaqanka, gaar ahaan markaad eegto meeqaamka saree dhaqanku ka taagan yahay ltoobiyada manta, gabdhaha Canfarta een waraysannay waxay tilmaameen in dhaqanka (65%) iyo diintu (21%) ay yihiin dhiirigeliyayaasha caadadan ee bulshadooda.

3 Gudniinka gabdhuhu waa afar nooc. Nooca 1 (Clitoridectomy) kintir-jarid waa marka qayb ama gebi ahaanba la jaro kintirka. Nooca 2 (excision) waa marka la jaro qayb ama gebi ahaan ba kintirka iyo faruuryaha gudaha (faruuryaha ku wareegsan xubinta taranka) iyo faruuryaha waaweyn ee sare). Nooca 3 (infibulation ama fircooni) waa marka la yareeyo daloolka xubinta taranka iyadoo la xidhayo iyadoo la adeegsanayo tollitaan ama qaabkale. Nooca 4 waa dhammaan nidaamyada kale ee waxyeellada uleh xubinta taranka sida durida, daloolin, goyn, xojid amd gubidda meesha.

Sanduuqa 2: Isbeddelka sii kordhaya ee dhakhtareynta gudniinka gabdhaha

Inkastoo ay 2017-kii ay wasaarada caafimaadku mamnuucday in xirfadlayaasha caafimaadku ay sameeyaan gudniin, iyadoo ka cabsi qaba in haddii caadadaas la 'dhakhtareeyo' ay adkaanayso in la ciribtiro, waxay cilmi-baaristayadu heshay in gaar ahaan deegaanka soomaalida, gudniinka la dhakhtareeyey. Qaar ka mid ah jawaab-bixiyayaashu waxay sheegeen in gudniinka lagu sameeyo xarumaha caafimaadku iyo kilinikyada gaarka loo leeyahay uu sii kordhayo. Tusaale ahaan, Madaxa qabalee kamid ah tuulooyinka deeganka soomaalida wuxuu yiri:

Xilliyadii hore, waxay ku qasbanaan jireen in ay gudniinka ku sameeyaan meelo qarsoon laakiin hadda waxay si cad ugu gudaan xarummaha caafimaadka, oo waxaa xitaa gudniinka Sunnaha (Nooca 1) masuul ka ah shaqaalaha caafimaadka ee bulshadaas. Xitaa haween dhaqammeedkii ayay hay'aduhu tababaraan una sheegaan muhiimada nooca sunniga (Nooca 1) iyo khatarta fircoonigu (waxaan ahayn Nooca 1) nolosha gabdhaha yaryar inta ay leegtahay.

Aabbe ka qayb-galay iskutashi-wadareed deegaanka Soomaalida ka dhacay ayaa sidaa si lamid ah wuxuu sheegay in adeeg-bixiyayaasha daryeelka caafimaadku ay kordhiyeen ku lug-lahaanshohooda caadadan:

Berigii hore, xattaa wiilasha ayaanu duurka u kaxayn jirnay si loogu soo gudo6 xaggaas, haddase – gabdho iyo wiilalba – waxa loo qaadaa cusbitaalada iyo xarumaha caafimaadka si loogu gudo... Kuwa ka shaqeeya xarumaha caafimaad, haweenka dhakhaatiirta ah [ayaa sameeya]. Waxay ka umuliyaan haweenka – ee sidee ayayna ugu lug-lahaanayn gudniinka gabdhaha?

Intaas waxa dheer, qaar kamid ah dadkaan waraysanay ayaa sheegay in farmasiyada gaarka loo leeyahay ay bixiyaan tababaro ku saabsan sida loo isticmaalo xanuun-baabiiyaasha, siyaanna umuliso dhaqameedyada (si qarsoodi ah) iyo in kalkaaliyayaasha iyo umulisooyinka laftooduba ay mararka qaar tegaan xaafaha gabdhaha si ay halkaas ugu sameeyaan gudniinka.

* *Waan ognahay in gudniinka raggu faa'iidooyin badan oo caafimaad leeyahay, xagga gudniinka gabdhuhu keliya waxyeello leeyahay, markaa ma aha inaan labada isku mid ka dhigayno Itoobiyaanka badankoodu ereyga gudniin ayey u isticmaalaan ka wiilasha iyo ka gabdhaha.*

Sanduuqa 3: Dhaawacyada jidheed iyo maskaxeed ee uu sababo gudniinka gabdhuhu noloshooda

Darasadayadu waxay ogaatay in gudniinka gabdhuhu uusan ahay xanuun hal-mar ah oo gabdhaha iyo haweenku maraan/lakulmaan, laakiinse uu keeno caafimaad darro iyo silac inta gabadhu nooshahay ah. Gabdhaha la tolo waxay ka cawdeen xanuun xilliga kaadida iyo dhiiga caadadaba ah. Kuwo badan baa qirtay inay kas isu harraadiyaan si aysan kaadi u qaban iyo caabuqa kaadi-mareenka oo soo noqnoqda.

Gabdhaha yaryaree la qabo iyo haweenkuba waxay ku dareen in dib-ufirida xubinka ee xilliga guurku ay tahay isha kale ee dhaawac. Soomaalida, badanaa waxa sameeya haween dhaqameed, inkastoo xirfadlayaasha caafimaadka ee sameeyaa ay beryahan soo kordhayaan. Waxa la qabaa inay arrintan ka dhalatay tababar ay hay'adi u qabatay haween dhaqameedka maxalliga ah iyo xirfadlayaasha caafimaadka oo ku saabsanaa sida loo isticmaalo suuxisada si xannuunka loo dhimo. Gabdhaha isla marka dib loo furo waxa laga rabaa in ay galmo samayso. Canfarta oo lasheegay in ay iska caadi tahay in nimanku xoog isticmaalaan si ay ufurtaan xubinka taranka ee haweenkooda, iyadoo badanaa garaaca dumarkooda isagoo ay saxiibadiis gabadha u xaj-xajinayaan, ayey wiilashu waxay qirteen in dib-ufuridu ay raggaba aad u xanuujiso. Wiil da' weynaa oon waraysi-wadareed la yeelanay ayaa sheegay:

Xilliga galmada ugu horreysa waxay gabdhuhu dareemaan xanuun zaa'id ah marka uu wiilku/ninku isku dayo inuu bikro-jebiyo... caruusyada cusubina wey la dhibaatoodaan marka ay bikra-jabinaayaan sababtoo ah aad buu cidhiidhi uyahay godku, nabarkana aad bay u adag tahay in la dalooliyo, caruusyadu waxay dhutiyaan saddex ilaa afar oisho kadib markay bikrajabiyaan haweenkooda, xanuun kadhashay isliiska marka uu la rafaadsan yahay bikro-jabinta awgiis.

Waxa kaloo la sheegay Canfarta in ragga qaar isticmaalaan Viagra, si ay u kordhiyaan 'awoodooda' ayna reerkooda u wataan; in ragga qaar ay asxaabtooda ka dalbadaan inay kufsadaan xaaskooda cusub maadaama aysan udulqaadan karayn oohinteeda; iyo in ragga qaar ay ku qasbanaadaan inay middiyo isticmaalaan, taasoo keeni karta dhiigbax iyo xitaa dhimasho.

Gabdhaha iyo haweenka la xidhay waxaa kale oo ay dareemaan dhaawaxyo iyo khatarta isku-furanka (fistula) oo korodha iyo dhimasho waqtiga dhalmaada ah. Khaasatan waxay tani ka jirtaa deegaanka Canfarta xagaasoo la sheegay in haweenka dib loo tolo xataa iyadoo afar dhala

Deegaanka soomaalida, 78% oo kamida gabdhaha 10-19 jirrada ah een waraysannay waxay sheegeen in ay maqleen gudniinka, 72% kamid ah kuwaasna ay qirteen in iyaga la guday. Gabdhaha sheegay in la guday waxaa celcelis ahaan la guday markay jireen 9 sanno, saddex meelood meelina waxay sheegeen in ay talo ku lahaayeen waqtiga lagudayey. Si la mid ah Canfarta, gabdhuhu waxay

sheegeen in dhaqanka (54%) iyo diintu (33%) ay yihiin dhiirigeliyayaasha caadada. Heerka gudniinka gabdhaha deegaanka soomaalidu kama yara oo keliya kuwa dhigooda ah ee Canfarta, balse waxuu aad uga hooseeyaa tiradii hore ee 95% gabdhaha da'doodu 15-19 sanno udhaxayso ee sheegay in la guday xogtii sahanka Dadweynaha iyo Caafimaadka Itoobiya. Tan, haddaba ma aha in loo turjunto

in ay caddayn u tahay in horumar la sameeyay. Bal e waxay xoojinaysaa muhiimada ay leedayay in loo kuurgalo kaladuwanaashaha qaabka loo sameeyo gudniinka iyo sida ay taasi wax adag uga dhigayso in la is barbardhigo muunado kala duwan. Maadaama gabdhaha deegaanka soomalida lagu gudi karo da' kasta –ilaa da'da guurka- gabdho badan oo ka mid ahaa kuwaan waraysanay, kuwaasoo celcelis ahaan jiray 13 sanno waqtigii xog-ururinta, ayaa laga yaabaa in la gudo sannadaha soo socda. Waxa intaas dheer, dhammaan gabdhaha ka qaybgalay xog-uruurintanadan ee deegaanka soomalidu waxaa loo guday qaabka 3/ fircooniga iyo tolitaan. Mid ka mid ah natiijooyinkii doorka laahaa ee kasoo baxay daraasada tiraabraaca iyo kulankii bahwadaagta aanu la yeelanay ayaa ahayd in haddii gabadh lagudi waayo ay ka dhigan tahay in ay ku guur waayeyso gabadhaasi. Mar aan waraysi-wadareed la yeelannay wiil aan weli guursan ayuu mid kamidah ka qaybgalayaashu sidan yidhi:

Wiilashu waxay rabaan in ay guursadan gabadh la guday, qofna ma guursanayo gabar aan gudnayn sida aanu diin ahaan qabno. Gabdhaha tolan ayaa wanaagsan, wiilashu kuwaasay rabaan, waxaanay aaminsan yihiin in ay sharafteeda iyo ta qoyskeeduba ay dhowran yihiin maadaama ay xidhan tahay. Ma rabno kuwa loo guday qaabka sunniga.⁴

Haweenka guda gabdhaha (waa haween laga yaabo inay ushaqeeyaan umuluso dhaqan ahaan) ayaa ah dambiiyaasha ugu waaweyn ee gudniinka gabdhaha: wax dhan 89% ka mid ah gabdhaha Canfarta iyo 83% kuwa soomaalida waxa guday haween dhaqameedkan. 10% gabdhaha Canfarta iyo 15% ka mid ah gabdhaha Soomaalida ayaa sheegay in ay hooyooyinkood gudeen. Si kastaba ha ahaatee, daraasadayada tiraabraaci waxay ogaatey in inkastoo hooyooyinku ay qab-qabtaan gabdhahooda, iyagu ma jar-jaraan/gudaan gabdhaha. Waxa ay gabdhuhu rabaan in ay sheegaan waa in hooyooyinku yihiin kuwa go'aanka kama dambaysta ah leh arrimaha gudniinka oo u diyaariya gabdhaha si loo gudo – iyadoo ay soo kordhayaan kuwa ay gudayaan xirfadlayaasha caafimaadku. Gabadh 13 jir ah oo deegaanka soomaalida kasoo jeeda ayaa sharaxday 'Go'aanka gudniinka gabdhaha waxaa qaata hooyooyinka, waana hooyooyinka kuwa go'aamiya caadooyinkan.' Si la mid ah warkaa gabdhahaas, iyo digniinahaas kor ku xusan, waalidiintu waxay sheegeen sababta ugu wayn ee caadadani usii jirtaa in ay tahay dhaqanka (67% iyo 52% Canfarta iyo Soomaalida siday ukala horreeyaan), iyo in la xakameeyo dabecadaha gabdhaha (10% labada deegaanba).


Natiijooyinka doorka leh


- Tiro aad u yar oo gabdhaha daraasadayada ka qaybgalay ayaa reer leh, sababtuna ay tahay in badankoodu ay da' yaraayeen—laakiin guurka carruurta caadi baa loo arkaa labada dhaqanba
- Guurka la qorsheeyen (isa-siinta) ayaa aad ugu badan Canfarta; gabdhaha badankoodu iyagoon rabin ayaa la guursadaa. Si ka duwan taas, aroosyada Soomaalida badankood go'aanku dhallinyartuu kasoo go'aa.
- Tiro aad u yar oo dhallinyaro ah ayaa ka war qaba inay jirto da' da sharci ahaan ugu yar ee lagu guursan karo, dhallinta labada deegaanna waxay badankoodu sheegeen da'da ugu munaasabsan ee guurku inay tahay wixii 18 ka wayn.
- Gabdhaha ayaa inta badan in ka badan wiilasha taageera guurka carruurnimadaa.
- Taageerada guurka carruurnimada waxaa qaabeeya dhaqamada bulshada—waxay u badan tahay in ay taageraan bulshada meelaha ay jawaab-bixiyayashu aaminsan yihiin inuu caadi yahaya.
- Aqoonta waalidku waxay yaraysaa taageerada guurka carruurnimada.
- Waxa jira istaageerid jiilasha kala duwana—fikradaha waayeelka iyo dhallinyaradu ka qabaan guurka carruurnimadu waa kuwo isxoojiya.
- Helitaanka waxbarashadu waxay dhintaa taageeridda guurka carruurnimada ee deegaanka Canfarta laakiin maaha Soomaalida.
- Qoysaska ladan ee soomaalida ayay ubadan tahay inaysan taageerin guurka carruurnimada—Canfartase taas lidkeeda ayaa run ahh.
- Sarraynta isku-kalsoonida dhallinyartu waxay yaraysaa ama dhintaa taageerada guurka Carruurnimadan.

Tiro yaroo ka mid ah waalidiinta ayaa ka war qaba in gudniinka gabdhuhu leeyahay khatartiisa. Keliya 42% ka mid ah kuwa deegaanka Canfarta ka sugan iyo 36% kuwa Soomalida ayaa sheegay in ay jiraan khataro ka dhalan kara caadadan. Khataraha la xusay wey ka siman yihiin deegaanadu – laakin way kala miisaamid duwan yihiin. Canfarta, waalidiintu waxay carrabka ku adkeeyeen dhalmo xanuunbadan (95%) iyo galmo xanuun badan (50%) in ka badan inta caabuqa (21%). Soomaalida, waxay xooga saareen caabuqa (95%) iyo dhalmo dhib badan (53%) in kabadan galmo xanuun badan (33%). Kawacyi-qabka khataruhu – xaggii uu sababi lahaa dhimida gudniinka gabdhaha – waxa uu sababay in bulshooyinku 'dhakhtareeyaan' caadada (fiiri Sanduuq 2). Intaa waxaa dheer, waxaaba ay u badan tahay in waalidiintu sheegaan in gudniinka gabdhuhu leeyahay faa'iidooyin –gaar ahaan

4 'Sunnii' waxaa badanaa loola jeedaa Qaabka ama Nooca 1 ee gudniinka gabdhaha.


Sawirka 1: Natiijooyinka falanqaynta (Regression) ee fikradaha laga haysto rabitaanka gudniinka gabdhaha


 Qayb ka ah keliya moodheelka sin-dheerta, muhiimna ah


 Qayb ka ah moodheelka waalidiinta/daryeel-bixiyayaasha ahna muhiim



Yareeya taageerada gudniinka gabdhaha

 Qayb ka ah moodheelka waalidiinta/daryeel-bixiyayaasha ahna muhiim

 Qayb ka ah moodheelka sindheerta iyo waalidiinta/daryeelayaasha – laakiin muhiim u

 Qayb ka ah moodheelka sindheerta iyo waalidiinta/daryeelayaasha –muhiimna u ah labadoodaba.



Kordhiya taageerada gudniinka gabdhaha


 Sin-dheertu wey weyntahay

 Sindheerku/tu dugsigaa ayuu diwaangashan yahay


 Sindheerku/sindheertu wuxuu leeyahay isku-kalsooni badan

Canfarta



 Haweenayda waalid ah ayaa maamusha lacagta

 Qoysku way ladan yihiin

 Gabdho badan oo qoyska ah baa la guday





 Aaminsan in gudniinka gabdhuhu khatar badan yahay




 Aaminsan in gudniinka gabdhuhu faa'iido leeyahay

 Aaminsan in gudniinka gabdhuhu amar diini ah yahay

 Waalidku hadda wuu fahansan yahay sharciga gudniinka gabdhaha

 Dakhliga qoysku waxa laga helaa il aan xoolaha ahayn




 Qoysku wuu weyn yahay

 Sindheerku/sindheertu wuxuu leeyahay isku-kalsooni badan

Soomaalida



 Madaxa qoysku waa qof wax bartay

 Dakhliga qoysku waxa laga helaa il aan xoolaha ahayn



Sanduuqa 4: Isbadalada guurka caruurta ee Canfarta

Iyadoo cilmi-baaris hore ay iftiimisy jiritaanka baahsan ee guurka absuma ee Canfarta (Jones et al., 2019; Presler-Marshall et al., 2020), natiijooyinka daraasadayada Tiraab-raacu waxay muujinayaan woxogaa isbeddelo ah- inkastoo ay curdin yihiin kana imanayaan meel hoose. Waalidiinta qaar ayaa u muuqda in ay hablaha in badan ka qayb-geliyaan go'aannada guurka, taasoo ugu horrayn ay sabab u tahay wacyiga kordhay ee xadgudubka lammaanaha iyo heerka furiin ee sare-ukacay. Qaar ka mid ah hoggaamiyayaasha diinta (oo la wareystay maadaama ay xog-ogaal yihiin) ayaa sidoo kale iftiimiyay in aysan Qur'aanka ku jirin wax taageeraya guurka absuma. Intaa waxaa dheer, waxaan maqalnay warbixinno dhowr ah oo ku saabsan gabdho ka soo horjeeda guurka absuma, oo soo ogeysiiyey guur ku soo fool lahaa xafiiska xafiiska haweenka iyo arrimaha bulshada ee heer degmo (degmo), macalimiinta, ama maxkamada shareecada (degmada aadka u magaalowday ee Caysaita). Gabadh 16 jir ahi waxay tiri:

Waa'iyadan danbe waxaa sii yaraanaya guur-dhaqameedkii absuma....habkuna waa, haddi ay gabadhu qaana gaadho, waalidku waxa uu bilaabayaa in uu raadiyo nin guursan kara ilmahooda. Way taageeraan (caruuska iyo caruusadda) haddii ay yihiin ilma abti, haddise uu yahay guurkoodu mid jacayl; gabadha iyo ninka ay is rabaan ayaa habaysta. Waalidkuna inta badan ma farageliyaan.

In kasta oo ay jiraan caddayn ah in guurka absuma uu soo yaraanayo, hoggaamiyaal diineedku waxay weli u doodayaan guurka carruurta. Waxay ku dhiirgeliyaan gabdhaha inay guursadaan ka dib caadada isla markiiba (bilowga caadada), sida caadiga ah qiyaastii 15 jir, maadaama in hore loo guursado oo la dhalmo badiyo loo arko inay tahay mid u wanaagsan danta guud ee qabiilka.

Soomaalida (68% vs. 45% Canfarta). Faa'iidooyinka la sheegay waxaa ka mid ah in uu xaqiijinayo in gabadhu u dhaqanto si wanaagsan (79% iyo 91% siday u kala horreeyaan) iyo in ay soo jiidan karto nin/sew wanaagsan (50% iyo 37% siday ukala horreeyaan).

Inkastoo aan ogaanay in gudniinka gabdhuhu uu sababi karo dhaawac jidheed iyo mid maskaxeed oo waqti nololeedka qofka (eeg Sanduuqa 3), tiro iska yar oo gabdho ah ayaa sheegay in uu khatartiisa leeyahay gudniinku. Canfarta oo gabdhaha sebinimada lagu gudo, keliya 6% gabdhaha kamid ah ayaa sheegay in gudniinku leeyahay khatar. Soomaalidana, 22% gabdhaha ayaa sheegay in uu khatar leeyahay.


Intaa waxaa dheer, gabdhuhu—sida waalidiintooda ayay u badan tahay inay sheegaan faa'iidooyinkiisa in kabadan khasaaroyinka. Ku dhawaad rubuc gabdhaha Canfarta (23%) iyo in ka badan kala badh (55%) Soomaalida ayaa sheegay faa'iidooyin uu leeyahay gudniinka gabdhuhu. Gabdhuhu waxa ugu weyn ey sheegeen saamaynta ay filayaan inuu gudniinku ku leeyahay dabeecada gabadha (89% iyo 84% Canfarta iyo Soomaalida siday ukala horreeyaan) iyo inay soo jiidato sey ku habboon (28% iyo 27% siday ukala horreeyaan). Waraysiyadii dambena way xaqiijiyeen dareemadaas ay qabeen. Gabar 13 jir ah oo Canfarta joogta ayaa sharraxday, 'gabadha aan la gudniin qoyska ceeb bay usoo jiidaa... gudniinku wax dhibaato ah uma keenayo.'


Inkastoo ay jirto taageero waalid oo inuu gudniinku sii jiro ah (63% Canfarta iyo 69% Soomaalida), waxa jira woxogaa wacyi-qab ah in uu heer federal sharci darro ka yahay (42% waalidiinta Canfarta iyo 34% kuwa Soomaalida). Kuwa sheegay inay aqoon u leeyihiin sharciiga ka yaala gudniinka gabdhaha, 10% oo Canfarta iyo tiro aad uga badan oo 80% Soomaalida ayaa qalad aaminay in Nooca


1 la ogol yahay –taasoo laga yaabo inay ugu wacan tahay dadaalada dawladu ugu jirto yaraynta nooca fircooniga iyo taageerida noocyada 'khatarta yar' ee gudniinka gabdhaha. Waalidiintu aqoon aad u liidata ayay uleeyihiin ganaaxyada sharci ee sida khaaska ah sharci u xadeeyay. In kayar shan meelood meel ayaa si saxa u sheegay in waalidiinta iyo haweenka wax gudaaba eedda ay leeyihiin (19% Canfarta iyo 16% Soomaalida). Inta soo hadhay waxay sheegeen in keliya haweenka gudaal la ganaaxayo (30% Canfarta iyo 10% Soomaalida) ama in keliya waalidka la ganaaxayo (13% Canfarta iyo 11% Soomaalida).

Markaan fiirinay waxyaalaha xidhiidhka dhowr ah leh inay aaminaan waalidiinta iyo dhallinyaraduba in gudniinku sii jiro, waxay falanqayntayadu heshay caddaymo muujinaya sinnaansho iyo kala duwanaansho labada deegaan ah (fiiri Sawirka 1). Mar labaad, inagoo qabna digniinta ah in ay adag tahay in la kala saaro diinta iyo dhaqanka, aaminaada in gudniinku yahay waajib diini ah ayaa labada deegaanba ka ah arrin dhiiri geliya caadadan—si la mid ah dhaqanka. Wacyi-qabka khataraha gudniinku waxay niyad-jebisaa sii wadida caadadan, xagga aaminaada inuu faa'iido leeyahay dhaqankani ay dhiirgeliiso sii wadidda caadadan labada deegaanba. Inkastoo ay jirto aaminaada ah in yeelashada ilo dakhli oo kala duwani ay sababi karto in la iska caabbiyo u hogaansanka caadooyinka bulshada—maadaama ay qoysasku noqdaan kuwo degaansho dhaqaale leh ama si sahlan u heli kara adeegyo (gaar ahaan adeega waxbarashada) iyo macluumaad ay meesha ay ku nool yihiin darteed ku helaan – labada Deegaanba in laga guuro xooluhu (oo loo wareego dalag beerasho, shaqo, iyo ganacsi abuurasho) uma muuqan mid si aad ah u yaraysay taageerada waalidiinta iyo gabdhaha yaryari u qabaan sii wadida gudniinka. Xaqiiqadii, isbeddelkaasi


Sawirka 2: Natiiyooyinka falanqaynta (Regression) ee fikradaha laga haysto rabitaanka gurka carruurta


 Qayb ka ah keliya mood-heelka sin-dheerta, muhiimna ah

 Qayb ka ah moodheelka waalidiinta daryeel-bixiyayasha ahna muhiim

 Qayb ka ah moodheelka sindheerta iyo waalidiinta/daryeelayaasha – laakiin muhiim u ah sindheerta



 Qayb ka ah moodheelka sindheerta iyo waalidiinta/daryeelayaasha – laakiin muhiim u ah waalidiinta/daryeelayaahs


 Qayb ka ah moodheelka sindheerta iyo waalidiinta/daryeelayaasha –muhiimna u ah labadoodaba




Yareeya taageerida gurka carruurta




Kordhiya taageerida gurka carruurta


 Sindheerku/sindheertu waa ka warqabtaa sharciga gurka

 Madaxa qoysku waa haweeney


 Dakhliga qoysku waa ganacsiga yaryar

Canfarta


 Sindheertu waxay ka qayb gashaa ciyaar dhaqameedyada

 Sindheertu way diwaan gashan tahay dugsiga


 Isha dakhliga qoysku waa mid aan xoolaha ahayn


 Waalidku waxay guursatay intaysan gaadhin 18 jir

 Daryeelaha oo haweeney ah


 Qoysku waa ladan yahay

 Dakhliga qoysku waa ganacsiga yaryar


 Sindheertu/waalidku waxay taageeraan dib udhigida gurka


 Waalidku/madaxa qoysku waa qof wax bartay (marka laga reebo sindherta soomaalida)


 Sindheertu waa weyn tahay


 Aaminsan in gabdhaha badankoodu guursadaan 18 jir kahor


 Sindheertu waa dumar

 Lacagta gurka waa la bixiyay guurkii waalidka (marka laga reebo waalidinta soomaalida)

 Sindheertu waxay guursatay intaysan gaadhin 18 jir


 Madaxa qoysku waa haweeney


 Dakhliga qoysku waa ganacsiga yar yar (saamayn xoogan xaga dumarka)


 Qoysku waa ladan yahay

Soomaalida

 Sindheertu aad bay isugu kalsoon tahay

 Aaminsan in gabdhaha badankoodu guursadaan 18 jir kahor

 Madaxa qoysku waa haweeney (gaar ahaan gabdhaha)

 Dakhliga qoysku waa beerashada dalaga

wuxuuba u muuqdaa mid kordhinaaya taageeraha waalidka Soomaalidu u qabaan in uu sii socdo gudniinka gabdhuhu.

Sidoo kale, sida ka muuqata Sawirka 1, falanqayntayadu waxay si waadax ah u caddaynaysaa baahida loo qabo in deegaan kasta tillaabooyinka cidhibtirka gudniinka gabdhaha si ku habboon u diyaarsadaan. Tusaale ahaan, waxaa la ogaaday in haddii ay gabdhuhu heli karaan waxbarasho ay dhinto taaageerada gudniinka ee deegaanka canfarta, laakiin soomaalida maya. Sidaa si la mid ah, isku-filnaanshaha gabdhuhu waxay xidhiidh dhow la lahayd taageerada gudniinka oo yaraata deegaanka Canfarta oo ka duwan Soomaalida, taasoo saamayn muhim ah ku yeelanaysa jilalka mustaqbalka, maadaama uu heer aad u sarreeya marayo guurka carruurta iyo da'da sindheerta/qaangaarka oo hooyo lagu noqdo. Aqoonta waalidinta ee ku aaddan sharciga, dhanka kale, ayaa muhiim Soomaalida u ah, Canfartase maya. Waalidiinta soomaalida ee wacyigooda sharci sarreeyo ayaa inuu sii socdo gudniinku ka taageerid yar kuwa wacyigoodu hooseeyo . Soomaalida, waalidiinta wax qori kara waxna akhrin kara ayay u badan tahay inay taageeran sii wadida. Waxaa xiiso leh iyana kala duwanaanshaha arrimaha dhaqaale ee deegaanada. Canfarta, si ka duwan kuwan soomaalida,

hooyooyinka sheegay inay maamulaan wax badan oo khayraadka qoyska ayaa saddex jibaar in kabadan kuwa aan wax badan maamulin taageera gudniinka gabdhaha. Waxaa intaas dheer, taageerada gabdhaha ee sii jiritaanka caadadan ayaa lala xidhiidhiyay ladnaanshaha qoyskooda - laakiin maaha gabdhaha Soomaalida.

Marka la isku daro, natiijooyinka falanqayntayadu waxay tibaaxayaan isbeddel ku yimaada doorbidida gudniinka gabdhuhu inuu ubaahan doono wacyi-gelin fara badan oo ku saabsan khataraha/waxyellooyinkiisa, dadaalo lagu beddeleyo dhaqanka ragga ee ah doorbidida gabdhaha la gudah, iyo sharoiga oo la xoojiyo. Natiijooyinku waxay adkaynayaan in awoodsiinta dhaqaale ee dumarka iyo qoysasku ay u badan tahay inaysan keenaynin taageerida ka tegista – iyo xaqiiqdii in laga yaabo inay siiba kordhiso caadada , gaar ahaan Canfarta, taasoo ay sabab u tahay in haweenkii ay heleen khayraad iyo kharash ay u isticmaalaan fulinta gudniinka gabdhaha.

Qaababka iyo dhiiri-geliyayaasha guurka carruurta

Maadaama gabdhaha daraasadan ka qaybgalay celcelis ahaan da'doodu ahayd 13 sanno, keliya 3% Canfarta iyo



Gabadh 15-jir ah oo u dhalatay deegaanka Canfarta, rajeyneysana may jaamacad gasho oo ay shaqayso kahor inta aysan guursan
© Nathalie Bertrams/GAGE 2022

4% Soomaalida ayaa guur soo maray (2% iyo 3% ayaa hadda reer lahaa siday u kala horreeyaan, 1% guur hore ayay soo mareen oo laakiin xilligaa reerkoodu burburay). Celceliska da'dooda xilligii guurkoodu isku mid buu ahaa gabdhahaas -15.8 sanno Canfarta iyo 15.6% Soomaalida. In ka badan shan meelood meel(22%) labada deegaanba ayaa guursaday intaysan 15 jirsan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa kala duwanaa noocyada guurka ee deegaanada. 87% gabdhaha Canfarta ayaa guur qorshaysan/habaysan galay sida ay dhigayso caadadooda absuma (waxaa isguursada ilmaabtiyada si loo ilaaliyo iskuduubnida qabiilka), wax in yar ka badan saddex meelood meel (36%) ayaa sheegay inay dareemayeen inay diyaar ahaayeen xilligii guurkooda. (fiiri Sanduuq 4). Soomaalidase, taa caksigeed, keliya 21% gabdhaha la qabay ayaa sheegay in waalidkood arooskooda qorsheeyeen. Iyadoo ay jirto taxaddarka ah in gabdho aad u tiro yar oo ka mid ahaa ka qaybgalayaasha daraasadayadani reer lahaayeen, kudhawaad dhammaan gabdhaha reeraha lahaa ee Soomaalida (97%) ayaa caddeeyey khiyaar-yarida gabdhaha ee deegaanadooda oo sheegayna inay dareemayeen inay guur diyaar u ahaayeen markay aqal galayeen.

Waalidiinta/daryeel-bixiyayaasha markaan eegno, dumar aad u badan oo Canfarta (88%, marka la barbardhigo 58% Soomaalida) ayaa guursaday 18 jir ka hor, iyada oo celceliska da'da guurkoodu ay ahayd 16.2 sano (marka la barbardhigo 17.3 sano ee Soomaalida).

Waalidiinta/daryeelayaasha markaan eegno, dumar aad u badan oo Canfarta (88%, marka la barbardhigo 58% Soomaalida) ayaa guursaday 18 jir ka hor, iyada oo celceliska da'da guurka ay ahayd 16.2 sano (marka la barbardhigo 17.3 sano ee Soomaalida). Ku dhawaad dhammaan guurka daryeel bixiyayaasha ee Canfarta (97%) waxaa qabanqaabiyay waalidiinta, marka la barbardhigo 74% Soomaalida. Waxaan layaab lahayn farqiga weyn ee u dhexeeya saamiga haweenka sheegay in ay dareemeen in ay diyaar u ahaayeen guur wakhtigaas - wax ka yar kala badh (38%) Canfarta, marka la barbardhigo in ka badan afar meelood saddex meel (77%) Soomaali.

Caadooyinka bulshadu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan sii wadista guurka carruurta. Labada deegaan, inta badan Daryeel-bixiyayaasha (87% Canfarta iyo 79% Soomaalida) iyo dhalinyarada (87% iyo 54% siday u kala horreeyaan) waxay rumaysnaayeen inay caadi tahay in gabadhu guursato iyada oo aan da'da 18 gaarin. Intaa waxaa dheer, dhalinyaro aad u tiro yar (7% Canfarta iyo 2% Soomaalida) ayaa sheegay in ay ogyihiin in guurka qofka yar 18 jir uu yahay sharci darro. Iyadoo taasi jirto, dhalinyaradu waxay sheegeen inay doorbidayaan inay guursadaan iyagoo qaan-gaar ah. Celcelis ahaan da'da guurka ku habboon ayaa lagu sheegay 19 sanno Canfarta iyo 20.7 sanno xagga Soomaalida. Intaa waxa dheer, ku dhawaad saddex-meelood laba (64%) Canfarta iyo in ka badan kala badh (53%) soomaalidu waxay sheegeen in da'da ugu habboon ee guurka ay tahay 18 jir ama ka weyn. Dhalinyaradu waxa



Gabadh 16 jir ah oo hor taagan gurigeeda degmada Beeroaano ee deegaanka Soomaalida © UNICEF Ethiopia/2015/Ose

ay sheegeen in fikradahooda ay qaabeeyeen in hablaha loo ogolaado in ay waxbarashadooda dhamaystaan, jidh ahaana u diyaar garoobaan guurka, maskax ahaana in badan ugu diyaar garoobaan.

Marka la eego arrimaha sida dhow ula xidhiidha taageeridda joogtada ah ee guurka carruurta, falanqayntayadu waxay heshay caddaymo aan kala go' lahayn oo ku saabsan baahida loo qabo in si taxadar leh laysugu beego mashruucyada iyo caadooyinka maxalliga ah (eeg Sawirka 2). Tusaale ahaan, natiijooyinkayaga gudniinka gabdhahu waxay tilmaamayaan in helitaanka adeega waxbarashada ee sindheertu (dhallinyarada qaan-gaarka ah) ay xiriir dhow la leedayay inay yaraato taageeridda guurka carruurta ee dhallinta Canfarta - laakiin maaha Soomaalida. Sidoo kale, aqoonta dhallinyarada ee da'da sharciga ah ee guurka iyo ka-qaybgalka ciyaar-dhaqameedyada ayaa la ogaaday inay yarayso taageerada guurka carruurta, laakiin Canfarta kaliya. Dhanka kale, isku-kalsoonanta dhallinyaradu waxay xiriir la leedahay taageerada heerka hoose ee guurka carruurta ee Soomaalida, laakiin Canfarta maya. Marka la eego arrimaha dhaqaalaha, qaababka deegaanadu waa kuwa iska soo horjeedda—malaha Canfarta, qoysaska hodanka ah waxay ujanjeeraan inay ku noolaadaan miyiga, halka Soomaaliduna ay ujanjeeraan inay dhinaca magaalooyinka u bataan, oo ay helaan fursadaha ay magaalayntu dhaliso. Soomaali ahaan, hantida badan ee qoyska (taasoo lagu qiyaaso tasmada hantida) ayaa la ogaaday inay ka hor-tegto ama ka illaaliso guurka carruurta. Canfarta, taas cagsigeedaa run ahayd. Sidoo kale, Canfarta, ka guurista xoolaha iyo beerashada dalagyada ayaa la ogaaday inay hoos u dhigtay taageerada guurka carruurta, halka Soomaalida ay taasi keentay in la taageero. Xoolo-dhaqashada oo lagu beddelo ka ganaacsiga ganacsiyada yar yar ayaa la ogaaday inay ka ilaaliso guurka gabdhaha Soomaalida; Canfarta, taas cagsigeedaa run ah.

Gunaanad

Daraasadkayagu wuxuu iftiiminaya in ay dawladda Itoobiya iyo hay'adaha gargaarkaba uhadhsan yihiin wax badan oo ay qabtaan, sida ugu dhakhsaha badanna u hirgaliyaan talaaboyinkii ay qaadeen si loo baabiiyo gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta. Run ahaanti bulshooyinka canfarta iyo soomaalidaba, oo ahaa meelaha aan ka samaynay daraasadkayaga ,maanu helin cadeymo na tusaya in gudniinka gabdhuhu noqday wax ayna bulshadu rabin; cadaymana umaanu helin in uu yaraaday, waxaa kale oo aan cadayn u waynay in habkii hore ee gudniinka loo sameyn jiray lagu beddeley hab ka dhibaato yar; wali waa sidii uun tolitaanki dumarka la tolalay. Waxaan hadda cadeymo haynaa in gudniinka noocyadani soo dhex galeen ama xidido ku yeeshen bahda caafimaadku.

Anagoo tix raacayna cadeymaha jira, daraasadayadu waxa ay muujinaysa in guurka caruurta laga yaabo inu kusii bato bulshooyinka soomalida oo da'da gabdhuhu ku guursanayaan kolba hoos usii socoto. Dhaqankan dhibaataada badan ayaa waxuu la socdaa oo walibana xoojinaya, ad adayga ka yimid xeerarka xaddidaada jinsi kuwaasoo gabdhaha ama dumarka kaliya ku qiimeya awooda tarankooda, hawshani waxay xadidaysaa helitaankii wax barashada ,shaqada iyo go'aan qaadashada dumarka. Diidmada dawladda deegaanada Canfarta iyo Somaalida in ay hirgaliyaan sharciga qoyska ee Ethiopia, kaaso sheegaya in gudniinka gabdhaha iyo guurka dagdaga ah ee caruurta yahay sharci daro ayaa fudaydiyay in ay dhaqamadani sii socdaan.

Intaas ka bacdi , daraasadkayagu waxa kale oo uu helay iftiin horumar iyo rajo. Xaga gudniinka fircooniga dadka waawayn aya kolba xog ka helaya in ay jiraan sharcio dalka ah oo mamnuucaya dhaqankan. Culumaa-udiinka ayaa iyaguna ka war haya khatarta uu leeyahay fircoonigu ama in xubinta taranka gabadha la isku tolo marka loo eego in qaybta kintirka la gooyo. Xaga guurka dagdaga ah ee caruurta , gabdhaha canfarta iyo soomalida aya waxay awood u leeyihiin in ay guursadaan ninka ay rabaan, intii waalidku usoo doori lahaa. Gabdhaha qaangaadhka ahna waxay soo jeclaysanayaan in ay guursadaan 18 jir kadib, in kastoo ay jiraan cadeymo qaarkood oo sheegaya caksiga. Waxa muhiim u ah horumarka mustaqbalka, in daraasadkayagu iftiimiyay in hadii la doonayo gudniinka fircooniga iyo guurka dagdaga ee caruurta meesha laga saaro, inay muhiim tahay in aan diirada saarno waxyaabaha ay iskaga yihiin iyo kuwa ay ku kala duwanyihiinba. Tan waxa ku jira isku eekanshaha iyo kala duwanaanshaha gudniinka fircooniga iyo hab dhaqanka guurka caruurta ay ugu kala duwanyihiin deegaannadu, iyo sidoo kale isku eekanshaha iyo kala duwanaanshaha waxyaabaha sii dhiiri galinaya gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta deegaanada dhexdooda. Tusaale ahaan, inkastoo daraasadayadu ogaatay in wali gudniinka gabdhuhu (weliba nooca fircooniga ah) yahay caadada bulshada canfarta iyo soomalida, waxa uuna soo jeedinayaa in wacyi galinta (ku saabsan khatarta, faaidada laga helayo iyo sharciguba) ay muhiim u yihiin sidii loo yarayn lahaa dhaqamadan, labada deegaanba. Waxa ay sidoo kale soo jeedinaysaa daraasadayadu, in wacyi galinta si taxadar leh loo hirgaliyo iyadoo lagu xisaabtamayo kala duwanaanshaha dhaqamada iyo wadooyinki loo mari lahaaba. Tan waxa ku jirta, da'da gabdhaha lagu sameynayo gudniinka fircooniga (da'da ilmaha yare e canfarta iyo da'da ilmaha somaliga ah ee qaangaadh ku dhow) iyo ogaanshaha in waxbarashadu yarayso taagerida gudniinka gabdhaha ee canfarta balse ay na yarayn soomalida. Waxa intaas dheer, inkastoo gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta

ay siyaabaha qaarkood u yihiin laba dhinac oo isku mid ah, taasi waxay ku tusaysa ama ka tarjumaysaa aaminad qoto dheer in qiimaha dumarku ku koobanyahay guur iyo hooyonimo. Daraasadkayagu waxa uu hoosta ka xariiqay in dariiqooyinka loo marayo ciribtirka ay aad u kala duwanyihiin. In gudniinka gabdhaha ay ka adagtahay in la ciribtiro marka la barbar dhigo guurka caruurta. Run ahaantii, inkastoo dhaqaale ahaan awoodsiinta dumarka iyo qoysaskoodu ay yarayn karto khatarta guurka carrurta ee hablaha, waxay cidhifka kale keeni kartaa sii xoojinta gudniinka fircooniga.

Saamaynta siyaasadeed iyo barnaamij-dejineed

Inkastoo mustaqbalka wareegyada danbee cilmi-baaristu ay bixin doonaan aragti dheeraad ah oo ku saabsan waddooyinka ugu wixtarka badan ee loo maro isbeddelka, natiijooyinkii cilmi-baaristayada aasaasiga ah - oo lagu daray dib-u-eegista caddaymaha hore ee jiray - waxay noo horseedayaan inaan soo jeedinno in dawladda Itoobiya iyo bahwadaagteeda horumarineed ay si degdeg ah ugu socdaan horumarka khariirada heer qaran si loo ciribtiro guurka caruurta iyo gudniinka fircooniga, iyo in lagaadho yoolasha horumarka waara, waa in ay si hami leh u fakiraan. Dadaalku waa inu noqdaa mid miisaan leh, oo lagu dhex daro qorshayaasha waaxyaha kala duwan, la isku duba rido waaxyaha iyo heerka oo dawlada ah, lagana soo qaato khibradda ururada aan dawliga ahayn ee diiradda saara carruurta iyo jinsiga, in lala xidhiidho odayo-dhaqameedka iyo culumaa uddiinka oo ay ogaadaan in dhammaan xubnaha bulshada - haweenka qaangaarka ah iyo ragga iyo gabdhaha qaangaarka ah iyo wiilasha - ay door ka ciyaari karaan ciribtirka gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta. Waxaan soo jeedineynaa talaaboyinka mudnaanta leh ee soo socda:

In dadka sharciga lagu wacyi geliyo, ciddii ku xad gudubtana sharciga la horkeeno

Maadaama aqoonta loo leeyahay sharciga qaranka ee dalku ay xadidantahay, fulintiisuna kabasii yartahay, waxaan ku boorinayna waaxda cadaaladu inay sare u qaadaan, dadaalada lagu hormarinayo, laguna xoojinayo sharciyada qaranka ee la dagaalamaya caadooyinka xun xun. Waxaana ka mida:

- la shaqaynta hoggaamiyayaasha dhaqanka iyo bulshada si loo hubiyo in bulshadu ogaato in dhammaan noocyada gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta ay sharci darro yihiin;
- la shaqaynta maxkamadaha shareecada - si loo horumariyo gabdhaha iyo dumarka xuquuqaha ay leeyihiin ee waxbarashada, dhaxalka, iyo inay ka madax

bannaanaadaan gacan kahadalka iyo kor u qaadida iskaashiga ka dhexeeya maxkamadaha shareecada iyo maxkamadaha dawliga ah iyo nidaamka caddaaladda;

- samaynta habab warbixineed oo qarsoodi ah (sida dugsiga) kuwaas oo loo isticmaali karo si looga hortago gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta ee la qorsheeyay;
- la shaqaynta bulshooyinka si loo dejiyo, ciqaabo la dhaqangelin karo marka xadgudubyo dhacaan iyo xoojinta hababka iyo kormeerka heer qabalee;
- la shaqaynta gabdhaha iyo dumarka si ay u ogaadaan xuquuqahooda iyo siday ku heli lahaayenba;
- la shaqaynta wiilasha iyo ragga waawayn si ay u ogaadaan sharciga iyo ciqaabta u qoran xadgudubyada;
- in lagala doodo dawlad deegaanada in ay sharciyada deegaanka waafajiyaan kuwa qaranka u yaala, kuwaas oo mamnuucaya gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta labadaba iyo in la ansixiyo sharciga qoyska si dhaqamadaas looga dhigo fal dambiyeed.

La shaqaynta gabdhaha iyo haweenka si loo beddelo caadooyinka jinsiga iyo dhaqamada xaddidaya noloshu gabdhaha iyo haweenka iyo doorashooyinka noloshooda

Maadaama isla xeerarka xaddidan ee jinsi ee keena gudniinka gabdhaha iyo guurka caruurta ay sidoo kale ka horjoogsanayaan gabdhaha iyo haweenka inay helaan waxbarasho iyo shaqo, iyo in ay yeeshaan fikradda go'aan qaadashada, waxaan ku boorinaynaa Xafiiska Haweenka iyo Arrimaha Bulshada inay si toos ah wax uga qabtaan afkaarta noocana iyo dhaqamadan. Waana in la sameeyaa:

- dadaal ballaaran oo kor loogu qaadayo wacyiga haweenka ee xuquuqdooda (iyo gabdhahooda) iyo sida loo soo sheego xadgudubyada;
- Abuurista wadooyin iyo fursado ay haweenku (iyo habluhu) ku horumarin karaan xirfadahooda, oo ay ku jiraan, kuwa loo diiday inay helaan waxbarasho rasmi ah, akhris, qoritaan iyo xisaabinba;
- la shaqaynta hooyooyinka si loo xoojiyo gabdhahooda, wiilashoodana ay ugu dhiirigeliyaan in ay qaataan go'aano raganimo oo ay ku jiraan ka fogaanshaha caadooyinka ka dhigaya hablaha aan la gudin inay yihiin kuwo 'aan la guursan Karin';
- la shaqaynta bulshooyinka si kor loogu qaado wacyigalinta ku saabsan muhiimada waxbarashada gabdhaha iyo sidii si dhab ah loogu taageri lahaa;
- wax ka qabashada gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta, qaab gobol ahaan ah, loogu tala galay in lagu xisaabtamo go'aan gaarista (tusaale ahaan sida gabdhaha soomalida oo fikiro badan kuleh) iyadoo gabdhaha iyo qoysaska iyo bulshada la baro

khatartooda, la tacaalida faa'iidooyinka ay u arkaan, iyo kor u qaadista wacyiga ku saabsan xaqiiqada dhabta ah. faa'iidooyinka ka fogaanshaha caadooyinka;

- xoojinta adeegyada (oo ay ku jiraan xarumaha dhaqancelinta) iyo kuwa dadka la kulmay falalka xadgudubka galmada iyo jinsiga ku salaysan;
- in lala shaqeeyo xafiiska caafimaadka si loo xaqiijiyo in gabdhaha la jar-jaray/guday ay helaan adeeg ku habboon oo caafimaad noloshooda in ta ka dhiman

In lagala shaqeeyo wiilasha iyo ragga inay kor uqaadaan wacyigelinta ka dhanka ah xeerarka jinsi ayna dhiiri geliyaan in la hirgeliyo ragannimo dhaanta tan/ka duwan/ wanaagsan

Maadaama aabeyaasha, wiilasha la dhashay, wiilasha isku faca yihiin, wiilasha xidhiidh ka dhexeeyo iyo ragga haweenku ay yihiin kuwo lug kuleh xeerarkan jinsi ee gabdhaha yaryar iyo dumarka waxyeellada ku haya, iyo gudniinka gabdhaha oo qudhiisa keliya la aaminsan yahay inuu yahay cadawga dumarka, hay'adaha dawliga ah iyo kuwaan dawliga ahaynba waxaa looga baahan yahay inay ka wada shaqeeyaan beddelida fikradaha ragga iyo caadooyinkoodaba. Waana in:

- in laga caawiyo gabdhaha aabeyaashood iyo walaalahood in la tuso siday u taageeri lahaayeen xaasaskooda iyo walaalahood si ay waqti ay wax ku bartaan u helaan gabdhuhu;
- in la baro wiilasha yaryar iyo raggaba in aysan muhiim ahayn la guursado gabadh la guday; iyo sida ay wiilasha yaryar iyo raggaba uga dhowri lahaayeen walaalahoodiyo gabdhahoodaba iyo inay ka hortagaan dhaawacyo kale oo soo gaadha xaasaskooda;
- in laga shaqeeyo in lakala reebo isku xidhnaanshaha darajada raggee bulshada dhexdeeda iyo gabdhooaha dhawrsanaantooda galmo iyo 'guushooda' guur;
- in la baro wiilasha yaryar iyo raggaba faa'iidooyinka la arki karo ee afo qaangaara (sida wehel nololeed)—iyo qasaarooyinka ay leedahay guursashada carruurta;
- dhiirigelinta go'aan qaadasho loo siman yahay iyo ragganimo cunfi-yar, iyo sida ay aabeyaashu wiilashooda si ka duwan ugu korin lahaayeen.

Ka bulsho ahaanna, in lala shaqeeyo waayeelka iyo dhallinyaradaba sidii loo doorin lahaa xeerarka jinsi iyo caadooyinka xaddida nolosha gabdhaha iyo haweenkaba

Maadaama xeerar jinsiyeedka xaddida nolosha gabdhaha iyo haweenkaba ay sidoo kale xaddidi karaan awooda bulshada xubnaheeda iyo hogaaminteedu ay ku garan lahaayeen waxna kaga qaban lahaayeen xeerarkaas, hay'adaha diirada saara carruurta iyo arrimaha jinsigu

waa inay la shaqeeyaan dhallinta iyo waayeelka sidii ay u doorin lahaayeen fikradahaas iyo caadooyinkaas iyo siday u kobcin lahaayeen awoodaha maxalliga ah. Dadaalada waa in la labanlaabaa si ay u midho dhalaan, si natiijo hor leh loogu gaadho waqtigeeda, waana in:

- taageero gabdhuhu helaan kuna guulaystaan waxbarashada;
- in lala mucaamalo dhallinta gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta si loo beddelo caadooyinka hadda jira ama in la dhiirigeliyo isbeddel jiil (hadba xaalada ayay ku xidhan tahay);
- in lagu taageero haweenku inay wax ka bartaan xuquuqahooda (iyo kuwa gabdhahooda) iyo siday u heli lahaayeen;
- in hooyooyinka iyo aabbeyaashaba la siiyo koorsooyin waxbarsho oo waalidnimo kuwaasoo la xidhiidha waxkaqabashada xeerar jinsiyeedyada iyo sida ay u waxyeelleeyaan gabdhaha iyo dumarkaba;
- adkaynta naadiyada dugsiga ee gabdhaha iyo jinsiga;
- taageerida dadka ku dayashada mudan iyo in lala shaqeeyo hogaamiyayaasha maxalliga iyo adeegbixiyayaashaba sidii kor loogu qaadi lahaa wacyigelinta la xidhiidha khataraha gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta.

In la hubiyo in ay gabdhuhu helaan waxbarasho, ilaa ka bixida dugsi sare

Maadaama ay u badan tahay in gabdhaha laga reebo waxbarashada marka la barbar dhigo wiilasha, waxaan ku boorinaynaa waaxda waxbarashada in ay labanlaabaan dadaaaladooda si ay uxaqiijiyan in ay gabdhuhu helaan adeeg waxbarasho, ugu yaraan inay dhameystaan dugsiga dhexe—iyo dugsi sare sida fiican. Waxaana ka mid ah:

- in la hubiyo in dhammaan bulshooyinka (xoolodhaqatada marka lagu daro) inay leeyihiin dugsiyo bixiya tacliin tayo leh oo luuqada hooyo lagu barto ugu yaaraan ilaa fasalka 6aad—iyo waxbarashada dadka waaweyn oo loogu talagalay gabdhaha waaweyn iyo haweenkii horey loogu diiday dugsiga;
- in guri-guri loogu tego si loo soo diwaangeliyo carrurta dugsiyada aan dhigan, oo la ganaaxo waalidka carruurta dugsiyada ka baxa, si ku habboon;
- ballaarinta waxbarashada manhajka leh iyo waxbarashada kaleba ee ka dhanka ah xeerarka jinsi; iyadoo taxaddar xooga la saarayo gudniinka gabdhaha iyo tacadiga galmada iyo jinsiga;
- in dugsiyada la geeyo agabka waxbarasho ee carruurta qoysaskoodu saboolka yahay;
- kor uqaadida maalgelinta barnaamijyada quudinta dugsiyada, iyo adeega nadaafada dugsiga ee WASH (biyo, nadaafad-deegaan, nadaafad-shaqsi) iyo agabka maaraynta nadaafada dhiiga-caadada, kaqayb

galka naadiyada gabdhaha iyo jinsiga iyo taageerada naqtiinka duruusta;

- dugsiiyo boodhan oo amni ah lana awoodi karo in loo sameeyo ardada dugsiga dhexe iyo dugsiga sare;
- koormeer badan inay sameeyaan xafiisyada waxbarashada ee degmadu iyagoo abaalmarinaya macallimiinta si loo yareeyo habsanka iyo shaqo-ka hadhida.

In loo isticmaalo ilaalada mujtamac si loo dhiirigeliyo qaadashada waxbarashada—guurkana dib loogu dhigo

Maadaama caddeymo heer caalamiya ay tilmaamayaan in sida ugu wanaagsan ee looga hor tegi karo guurka carruurta uu yahay in gabdhaha dugsiga lagu hayo inta ugu badan ee macquula, in la isticmaalo ilaalada bulshada sidii qoysaska loogu dhiirigelin lahaa inay gabdhaha waxbaaran guurkoodana dibdhigaan. Waa in:

- la bilaabo/dib-loo bilaabo barnaamijyada quudinta ee dugsiyada, iyadoo gabdhaha loogu kordhinayo cunto guriga loo qaadanayo;
- lacag iyo hanti siin si loo taageero waxbarashada gabdhaha, weliba shuruud looga dhigayo gabdhuhu inay xadiraan dugsiga iyo inaysan guursan mudadaas, iyo waalidiinta iyo dhallinyarada ka qayb-galkooda barnaamijyada diirada saara jinsiga;
- hanti in lagu wareejiyo si loo taageero gabdhaha iyo haweenku inay dakhligooda soo saartaan;
- in lala loollamo takoorka iyo kalasooqa, waxuu khiyaar noqonayaa in qoysaska si cad udiida caadooyinka xunxun la siiyo taageero sharci iyo daryeel bulsho. Qoysaskaasi waxay noqon karaan qoysas ku-dayasho mudan.

La shaqaynta shaqaalaha caafimaadka si looga hortago in la dhakhtareeyo gudniinka

Maadaama ay jiraan cadaymo muujinaya in shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay saartaan gudniinka gabdhaha, Xafiisyada caafimaadka ee heer deegaan iyo heer degmo waa inay siiyaan tababaro xirfadlayaasha caafimaadka si loo hubiyo in ay aqoon u leeyihiin sharciga qoyska ee mamnuucaya gudniinka gabdhaha, waana in ay ganaaxaan xirfadle kasta oo caafimaad oo lagu helo inuu sameeyo gudniinka gabdhaha.

In lagala shaqeeyo haweenka iyo gabdhaha inay hagaajiyaan hab-nololeedkooda

Maadaama gabdhaha iyo haweenku ay haystaan fursado aad utiro yar oo ay ku kasban karaan dakhliyadooda, waaxyahay beeraha iyo shaqadu waa inay kor uqaadaan ballaarinta iyo badinta khiyaarada hab-nololeed ee dumarka. Waa in:

- kuwaa lagu lammaaneeyo wacyigelin, si korodhka helitaanka dhaqaale ee gabdhaha iyo haweenku aysan xididdo ugu yeelan gudniinka gabdhaha, waana inay ku jiraan;
- koorsooyin qoraal iyo xisaabeed oo bulshada salka ku haya lasiiyo haweenka keliya, si loo dhimo helitaanka xaddidan ee waxbarashada ee gabdhaha iyo haweenka;
- horumarinta xirfada gabdhaha waaweyn iyo koorsooyin tababarineed sida dhaqashada xoolaha iyo xirfadaha shaqo ee dhaqanku ogol yahay oo ay barbar socdaan xirfadaha nololeed iyo xirfadaha maaliyadeed/ganacsi;
- fursado badan in la siiyo gabdhaha waaweyn iyo dumarka si ay u helaan adeegyada kaydsiga iyo amaahda.

In lagaga shaqeeyo hogaaminta deegaanada Canfarta iyo Soomaalida sidii kor loogu qaadi lahaa isbeddel bulsho iyo mid sharci oo ka dhan ah dumarka

Maadaama Canfarta iyo Soomaalidu aysan ka muuqan horusocodka deegaanada kale laga arko, waxaan ku boorinaynaa hogaaminta deegaanadu inay kor uqaadaan isbeddel bulsho iyo mid sharci oo hagaajin kara nolosha gabdhaha iyo dumarkaba—iyo horumarka qaybhiisa kaleba . waxaana ka mid ah:

- dedaallo lagu aqoonsanayo horyaallo (gaar ahaan hogaaminta dhaqanka iyo kuwa diinta) kuwaasoo diyaar u ah dhiirigelinta isbeddelka;
- horumarinta isbahaysi u ololeeya iswaafajinta xeerarka sharciga ee deegaannada iyo kuwa qaranka;
- u qoondaynta dhaqaale iyo khayraad maaliyadeed ooku filan si wax looga qabto caadooyinka jinsi ee ka hor istaagaya gabdhaha iyo haweenka inay helaan xuquuqdooda;
- iyo maalgelinta la-socod iyo qiimayn caddayn ku salaysan ee barnaamijyada loogu talagalay in wax looga qabto gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta, iyadoo diiradda la saarayo bulshooyinka fogfog halkaas oo faafitaanka ugu sarreeya.

Hawlgelinta hoggaamiyeyaasha diinta si ay dadka ugu dhiirrigeliyaan ka tegida dhaqamada waxyeellada leh oo ay beddelaan caadooyinka jinsiga ee xoojinaya xadgudubka galmada iyo jinsiga ku salaysan

Maadaama gudniinka gabdhaha loo arko waajib diini ah, guurka carruurtana loo arko mid diin ahaan la aqbali karo - oo xitaa la doorbido - waxaa muhiim ah in dhammaan jileyaasha (dowladda iyo kuwa aan dawliga ahayn) ay si dhow ula shaqeeyaan culimada si meesha looga saaro dhaqamadaas xunxun. Waxaana ka mid ah:

- kor u qaadista wacyiga culimada ee in ay sharci darro tahay inay u doodaan gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta, iyo in lagu soo oogi karo dembi haddey carruur cid u meheriyaan;
- Waxbarasho ku saabsan khatarta gudniinka gabdhaha (gaar ahaan isku-tolida/fircooniga) iyo guurka carruurta iyo faa'iidooyinka ku jira dib u dhigista guurka ilaa mudakarnimada;
- wax ka qabashada fikradaha khaldan ee in gudniinka gabdhaha iyo guurka carrurnimada ay diinta Islaamku ogoshahay/loo baahan yahay, iyo in la sameeyo doodo diimeed lagu qanco kuwaas oo taageeraya sidii loo dhamayn lahaa dhaqamada (oo ay ku jiraan wax ka qabashada fikradaha ah in gabdhaha la gudo si ay u gali karaan masaajidda iyo/ama u tukadaan);
- dhisida taageero waxbarasho oo gabdhaha loogu talo galay, gabdhaha iyo jiilalka mustaqbalka dartood;
- wax ka qabashada caadooyinka guud ee jinsi, oo ay ku jiraan aqoonsiga qiimaha ay gabdhaha iyo haweenku ku kordhiyaan qoysaska iyo bulshada, iyo muhiimada ay leedahay in wiilasha iyo ragga la baro in ay ka fogaadaan xadgudubka oo ay si wanaagsan ula dhaqmaan xubnaha haweenka ah ee qoyskooda.

Hawlgelinta hoggaaminta beelaha iyo dhaqanka si ay dadka ugu dhiirrigeliyaan inay ka tagaan dhaqamada xunxun

Sababtoo ah qabiilka iyo dhaqanku waxay udub dhexaad u yihiin aqoonsiga Canfarta iyo Soomaalida - iyo sii wadida gudniinka gabdhaha iyo guurka ubadka - waa in hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawlaga ahayn ay si dhow ula shaqeeyaan hoggaamiye dhaqameedyada si ay u bilaabaan inay beddelaan caqiidooyinka iyo dhaqamada dhibaya gabdhaha iyo haweenka. Tani waa inay ku jirtaa:

- horumarinta waxbarashada gabdhaha;
- kor u qaadista wacyiga ku saabsan khataraha gudniinka gabdhaha, gaar ahaan xidhxidhida/toltolida/fircooniga;
- kor u qaadista wacyiga khatarta guurka carruurta iyo faa'iidooyinka ay leedahay dib u dhigista guurka ilaa qaangaarnimada;

- hubinta in bulshooyinka - gaar ahaan haween-dhaqameedka wax guda iyo hooyooyinka - ay ogaadaan in dhammaan noocyada gudniinka gabdhaha ay yihiin sharci-darro oo ay mutaysanayaan ganaax iyo xadhig.

Sii wadida iyo balaadhinta dadaalka lagu furayo dariiqooyinka isbeddelka iyo taageeridda horyaalada heer walba

Maadaama Isbahaysiga Itoobiya ee Joojinta Guurka Carruurta iyo Gudniinka gabdhaha ay gaar ah ugu taagan yihiin sii wadista iyo dardargelinta dadaallada ku aaddan ciribtirka dhaqamadan xunxun, waa in ay sii waddo furista waddooyin cusub oo isbeddel iyo aqoonsiga iyo taageeridda horyaalada heer kasta ah. Isbahaysigu waa inay:

- la shaqeeyaan saraakiisha gobolka, si ay ugu doodaan is-waafajinta sharciyada qaranka iyo kuwa gobolka; Saraakiisha maamul-goboleedyada, si kor loogu qaado wacyiga iyo horumarinta fulinta; masuuliyiinta deegaanka, si ay u xoojiyaan go'aan qaadashada baabi'inta dhaqamada iyo in ay kormeeraan heer deegaan si loo taageero taas; iyo hoggaamiyeyaasha diinta iyo qabaaalka, si ay u udejiyaan qorshooyin ku habboon oo la fulin karo;
- la shaqayeeyaan wasaaradaha ay khusayso (gaar ahaan caafimaadka, waxbarashada iyo caddaaladda) si loogu daro ka hortagga guurka carruurta iyo gudniinka Fircooniga qorshayaasha waaxyaha dawladda, iyo kordhinta dadaallada loogu jiro ku haynta gabdhaha ee dugsiyada, taageeridda ballaarinta naadiyada hablaha iyo jinsiga; iyo la tacaalida dhakhtaraynta Gudniinka gabdhaha;
- taageeridda karti-dhisidda saxafiyiinta iyo soo-saareyaasha warbaahinta si ay uga warbixiyaan awood-siinta gabdhaha iyo haweenka si loo wargeliyo oo loogu dhiirrigeliyo gabdhaha qaan-gaarka ah iyo daryeelayaashooda awoodda ay u leeyihiin inay ka fogaadaan caadooyinka takoorka jinsi iyo inay hoggaamiyaan nolol awood iyo madaxbannaani leh.

Ballaarinta maalgelinta dedaalada loogu jiro ciribtirka labada caado, taasoo ay hagayaan qiimayn muddo-dheer oo awood leh

Maadaama ciribtirka gudniinka gabdhaha iyo guurka carruurta yahay mid khayraad iyo waqti farabadan ku baxayaan, hay'adaha horumarineed waa inay ballaariyaan maalgelinta ayna si adag uqiimeeyaan saamaynta iyagoo isticmaalaya daraasado qiimayn isku dhafan oo muddo dheer soconaya. Waana inay ku jiraan:

- maalgelinta waxbarasho loogu talagalay carruurta oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa ku nool bulshooyinka xoolodhaqatada ah ee fog fog;
- kor u qaadista illaalada bulsho ee qoysaska aadka u nugul, in looga faa'iidayto halka ay

suurtagal tahay si kor loogu qaado waxbarashada gabdhaha (iyo yaraynta guurka carruurta);

- xoojinta awoodda maamul goboleedyada si loo horumariyo adeegyada deegaanka;
- maalgelinta barnaamij-dejinta si loo beddelo caadooyinka wax xaddida ee jinsiga
- kor-uqaadida iyo hagaajinta barnaamijyada si loo kordhiyo habboonidooda;
- maalgelinta dabagal iyo qiimayn iyo cilmi baadhis muddo-dheer soconaysa si loola socdo horumarka, in la ogeysiiyo sida ugu wanaagsan ee loo isticmaalo khayraadka xaddidan marka laga eego dhinaca habboonaanta, iyo sida kor loogu qaadi lahaa barnaamij wax ku ool ah oo miisaan leh.

Tixraacyada

- Central Statistical Agency of Ethiopia (CSA) and ICF (2017) *Ethiopia Demographic and Health Survey 2016*. Addis Ababa, Ethiopia, and Rockville, Maryland, USA: CSA and ICF (<https://dhsprogram.com/pubs/pdf/FR328/FR328.pdf>)
- Central Statistical Authority/Ethiopia and ORC Macro (2001) *Ethiopia Demographic and Health Survey 2000*. Addis Ababa, Ethiopia: Central Statistical Authority/Ethiopia and ORC Macro (<http://dhsprogram.com/pubs/pdf/FR118/FR118.pdf>)
- Elezaj, E., Ramful, N., Cebotari, V. and De Neubourg, C. (2019) *Gender equality, women's empowerment and child wellbeing in Ethiopia*. UNICEF Ethiopia and Ministry of Women, Children and Youth (www.unicef.org/ethiopia/media/2811/file/Gender%20Equality,%20Women's%20empowerment%20and%20child%20wellbeing%20in%20Ethiopia.pdf)
- Jones, N., Gebeyehu, Y. and Hamory-Hicks, J. (2019) 'Exploring the role of evolving gender norms in shaping adolescents' experiences of violence in pastoralist Afar, Ethiopia' in D. Bühler-Niederberger and L. Alberth (eds.) *Victim, perpetrator, or what else? (Sociological Studies of Children and Youth, Vol. 25)*. Bingley: Emerald Publishing Limited (<https://doi.org/10.1108/S1537-466120190000025008>)
- Presler-Marshall, E., Jones, N., Dutton, R., Baird, S., Yadete, W., Woldehanna, T., Giday, E. and Gezaghne, K. (2020) *'Girls don't shout if they are raped... that is taboo': exploring barriers to Ethiopian adolescents' freedom from age- and gender-based violence*. London: Gender and Adolescence: Global Evidence (<https://www.gage.odi.org/publication/girls-dont-shout-if-they-are-raped-that-is-taboo-exploring-barriers-to-ethiopian-adolescents-freedom-from-age-and-gender-based-violence/>)
- UNICEF (2020) *A profile of female genital mutilation in Ethiopia*. Addis Ababa, Ethiopia: UNICEF (<https://data.unicef.org/resources/a-profile-of-female-genital-mutilation-in-ethiopia/>)